# Hogaanka Waxabarashada ee Qoysaska

Warbaxin kooban oo Ilmaha inay ogaadaan ay tahay iyo inay awoodi karayaan inay sameyn karaan iyo sida Qoysasku u kordhin karayaan Ku barashada Guriga.




*"Waxaanu aaminsanahay Qoysasku inay Waalidiinteena yahiin. Waxaa weeyaan quwada ugu horeysa uguna xooga badan ee wax bara Ilmaha. Inagoo isku duuban waxaan hubinaynaa inay ardadoo dhan guuleystaan."*

—Superintendent Emmanuel Caulk,
Portland Public Schools

## Waxyaalaha ku saabsan Hogaaminta waxbarashada:

*Hogaamintaan wax Barashadu waxey u taagantahay waxyaabaha Muhiimkaa ee ilmaahagu inuu ogaado ay tahay uuna awoodo inuu sameyn karayo luuqada ingiriiska aqriska iyo qoraalka dhamaadka iskuulka. Barashada Arimaha muhiimka ama ka guulgarida waxey Qoysaska iyo macalimiinta ka caawinayaan inay ogaadaan marka ardadu u baahanyahiin Caawimida dheeraadkaa iyo markeey u baahanyahiin wax ka sii yara adag oo ka badan waxey baranayaaan.*

## Maxay Qoysasku sameyn karayaan?

Waxyaalo badan ayaad ku caawin kartaa ilmahaaga xaga Barashada si aad uga caawiso isku diyaarinta mustaqbalkooda. Waa kuwan waxyaalo xoogaa oo ka caawinaya Ardayga xaga waxbarashada:

1. U sheeg ilmahaaga inay wax barashada kuu tahay Muhiim. U sheeg waxbarasha waa helitaanka Guusha.
2. Ha kuu ahaado Iskuulka waxa kuguu horeya. Taga iskuulka waqtigiisa saxda ha ka daahina maalin kasta.
3. Wdajir ula shaqee, ixtiraam shaqalaaha Maamulka iyo macaliminta Iskuulka.
4. Ku dhiiri gali inuu iskiis wax u qabsado, u ogolow ilmahaaga inay qalad sameyn karaan Aqbalna inuu wax kala dooran karo.
5. Kala hadal ilmahaaga wax aka dhacaya iskuulka.
6. La hadal macalinka ilmahaaga si aad u hubiso ilmahaaga horumarkiisa uu sameeyay sanad dugsiyeedka.
7. Imoow wada kulanka macalimiinta iyo waalidka iyo munaasabadaha kale ee iskuulka ka socda markay suurtogal kuu tahay.
8. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato Ilmahaaga sida uu yahay, ha ka gaban inaad la xariirto macalimiinta ilmahaaga hadii aad su'aal qabto.

## La hadalka macalinka ilmahaaga

Waa muhiim inaad la hadasho macalinka ilmahaaga kana warqabto iskuulka arimaha ku saabsan ilmahaaga horumarkooda taasi oo la xariirta goolasha waxbarashadooda. Kuwaan ayaa ka mid waxyaalaha looga baahanyahay inaad ka wada hadashaan.

- Si fiican ugu kuurgal barnaamijkaan Hogaamintaan waxbarashada oo waydii meesha ilmahaagu ama cunigaagu ku xooganyahay ama ku wanaagsanyahay iyo meesha ay u baahanyahiin inay ku sii horumaraan.
- Waxaa kaloo lagu sii darayaa goolasha waxbrashada ee hogaamintaan, Miyeey jiraan Goolal kale ee aad ilmahaaga ka fileyso inay ku sii wanaagsanadaan?
- Waydii inaad aragto ilmahaaga shaqadooda ama waxyaalaha ay sameeyaan iyo siday u asiibeen ama aysan wali u gaarin meeshii looga baahnaa goolalkooda.
- Waydii sida ilmahaagu cabirka horumarkoodu yahay Sanad dugsiyeedkii.

- Waydii hadii ilmahaagu ay heerkii laga rabay yahiin xaga waxbarashada. Hadii aysan gaarin maxaa iskuulka ku caawimayaa si ay u gaaraan? Maxaad guriga ku caawin kartaa?
- Waydii in ilmahaagu uu gaaray meeshii laga rabay amaba uu ka sare maray xaga waxbarashada. Hadii ay saa tahay maxaa kale ee iskuulka u qabanayaa? Maxaa guriga u sameyn kartaa?

## La hadlida Ilmahaaga

"Iskuulka side buu ahaa manta?"
"Fiican."
"Maxaad sameysay?"
"Waxba"

Midaasi miyay caadi tahay? Waa Cadi Sii waydii! Ardada Waalidkood Iskuulka kala hadlaan Iskuulka way ku wanaagsanyahay. Waa kuwanaa habab aad ilmahaaga kula xirmi karto oo aad ku caawin karto si uu u najaaxo:

- Sameyso waqti aad kala hadasho ilmahaaga Iskuulka maalin kasta.
- Waydii ilmahaaga inuu kuu sheego hal wax ay ku barteen Iskuulka manta. Maxaa aad u xiisa galinayay? Maxaa ku adkaa?
- Fiiri warqadaha iyo masawirada ama mashruucyada uu ka keenay iskuulka. Waydii ilmahaaga. Waydii ilmahaaga inuu kuu sheego si waadax ah maxay tahay waxbarashadu?
- Abaay marin sii ilmahaaga sida uu u galiya waqti badan uuna si adag u shaqeeyay "sida jawaabta saxda ah".
- Waydii su'aalo wax ilmahaagu ku fakarayaan: Sidee ku ogaatay taas? Maxaad u maleyneysaa? Maxaad u maleyneysaa? Maxaad Yaqiinsatay? Maxaa sidaasi u sameyneysaa? Miyeey jirtaa si kale aad ku heli karto Jawaabtaas?

## Caawimida Waxbarashada meelaha iskuulka ka baxsan

Waxbarashadu waa inaysan istagin marka ardadu iskuulka ka tagaan. Ardadu waxay waqtiga badan dhumiyaan markay iskulka dibadisa joogaan marka loo eego markay joogaan iskuulka. Waa kuwanaa Qaabab xoogaa ah eed aad ku caawin karto ilmahaaga markay iskuulka dibadiisa joogaan:

- U aqri cunugaaga, La aqri Ilmahaaga, Kuna dhiirigali Qoyska inuu lahaado waqtiga Aqriska Luuqada markaas aay isleedahay waad ku wanaagsantahay.
- U habee Meel aad u dagan oo aan shanqadh lahayn ee uu ilmahaaga ku sameeyo home waagiisa iyo mashruucyada kale eek u saabsan waxbarashada.
- Isku day inaad u dajiso jadwal caadiya ee lagu sameyo Home-waaga iyo shaqooyinka kale.
- U isticmaal Tilmaan hagidaan inuu ku feejignaado goolasha waxbarasho, Isku day Qorshe dajin waxbarasho ee guriga.

## Muxuu ilmahaagu u baahanyahay inuu barto ama ogaado dhanka aqriska iyo qoraalka:

### Luqada

- ❑ Inay isticmaalaan wareysi iyagoo soo ururinaya warbixin looga jeedo cilmi baaris; sida qoritaanka taariikhda qoyska.
- ❑ Isticmaalka ereyo astaan ahaan ah (ereyo loo isticmaalo si ka duwan macnahood arasmiga ah). *Tusaale ahaan: "Qorraxdoo uga ifaysa biyaha dhexdooda sida dheemanka oo kale."*
- ❑ Fahanka macnaha qarsoon ee u dhexeeya ereyada isu eg eg, sida diirran iyo kulul.

### Akhriska iyo Suugaanta

- ❑ Qeexidda fikradda looga gol leeyahay tuduca, waxyaalaha uu kaga duwan yahay qoraallada kale, iyo faahfaahin xoojinaysa qoraal aan ahayn khayaali (dhab ah).
- ❑ Grashada habka qoraagu u isticmaalo wada-sheekaysi iyo tilmaan marka la akhriyayo sheekooyinka khiyaaliga ah.
- ❑ Garashada sida mu'allifku u isticmaalo gogoldhigga sheekooyinka, muujinta jilaaga sheekada, iyo hordhaca sheekada marka la akhriyo sheekooyinka khiyaalig ah.

### Qoraalka

- ❑ Faahfaahinta suugaanta, curisyada iyo qoraalka curiska leh, isagoo ardaygu faahfaahin lagala soo baxay cashirka si ardaygu ugu taageero fikraddiisa. *Tusaale ahaan: warqad loo diro qoraaga buug ama shirkadda daabacday.*
- ❑ Qoraalka warbixin cilmi baariseed oo ardaygu isticmaalayo ereyadiisa, ula jeedo cad oo si fiican loo faahfaahiyey.
- ❑ Qoraalka sheeko ardaygu allifay oo leh qaybaha sheekooyinka khayaaliga ah: mu'aamarad, jilayaasha iyo isku habaynta.



## Barasha aqriska iyo qoraalka ee guriga

- ❑ Ilmahaaga kala sheekayso taariikhda qoyska. Ku dhiirigeli in ilmahaaga su'aalo curiyo, waraysto qaar ka amid ah qoyska, oo uu ka sameeyo sheekooyin wata sawirrada waalidka iyo awowyada.
- ❑ Maalin walba kor ula akhri ilmahaaga sheekooyin. Ka wada sheekaysta gulucda sheekada iyo jilayaasha. Su'aalo weydii. *Tusaale ahaan: "Halkee sheekada khilaaf kaga jiraa?" "Sida jilaaga ugu muhiimsan ee sheekada wax ka beddelaaya iyo sabata?" Sheekadu ku xir noloshadaa iyo buugag kale oo aad akhrideen.*
- ❑ Booqda adiga iyo ilmahaagu goobaha taariikhi ah ee degaankaaga ku yaal, sida Freedom Trail (Jidka xorriyadda) ama Portland Observatory (Guriga Cir-dhowrka). Dooro buug ku saabsan taariikh nololeedka mid ka mid ah dadkii caanka ahaa ee ku noolaa Portland. Kala sheekayso sida goobaha taariikhi ahi ay sheekadii uga dhigaan sida wax hadda dhacaya oo kale iyo sida sheekooyinka ka dhex dhacay uga dhigayaan guryaha wax muhiim ah oo xiiso badan.

Notes:

*Fadlan la xariir Macalinka ilmahaaga si aad u waydiiso Barnaamijyada wax aqriska iyo qoraalka iyo Xisaabta meelaha laga heli karo.*

## Muxuu ilmahaagu u baahanyahay inuu barto ama ogaado dhanka xisaabta:

- ❑ Inuu ka jawaabi karo su’aalo isugeyn, kala goyn, isku dhufasho iyo qaybin ah oo ay ku jiraan tiro ballaaran iyadoo la raacayo tallaabooyin dhowr ah.
- ❑ Fahanka xiriirka dhexeeya jajabka, jajab todablaha iyo boqollayda.
- ❑ Ka shaqaynta xisaab jajab ah yadoo lagu muujinayo jajab iyo jajab tobanle.
- ❑ Shax ku muujin iyo fasirka laba doorsoome, sid awaqtiga iyo dhererka. *Tusaale ahaan: garaaf ku muuji inta uu qofku koray 2 jir ilaa 10 jir, dabadeedna sharax markii koritaanku ugu dhakhso badnaa.*
- ❑ Garashada, faahfaahinta iyo is-barbardhigga sadex xagallada (xagal toosan, xagal daacsan, xagal fiiqan).
- ❑ Fahanka in afar geesyada siyaabo kala duwan loo sheegi karo.
- ❑ Garashada, sharaxaadda iyo is-barbardhigga shaxannada 3 dhinaclaha ah, sida afar geeslaha iyo saddex-geeslaha.
- ❑ Garashada iyo is-barbardhigga badadda afar-geesyada.
- ❑ Raadinta is-barbardhigga mugga iyo badadda saddex-dhinaclayaasha.
- ❑ Ururinta, shax ku muujinta iyo faahfaahinta xog bixinta.
- ❑ Isticmaalka celceliska iyo bar dhexaadka si aad go’aan uga qaadan lahayd.



## Barasha Xisaabta ee Guriga

- ❑ Ilmahaagu ha cabbiro ballaca iyo dhererka qol ka mid ah gurigaaga, ka dibna ha xisaabiyo badadda. Ilmahaagy waxa kale oo uu cabbiri karaa qol kale oo guriga ah, ka dibna is-barbardhigi karaa badadda labada qol.
- ❑ Raadi fursado aad ilmahaaga uga wada hadashaan tirooyin waaweyn oo aad la kulantaan nolol maalmeedkiinna. *Tusaale ahaan: is-barbar dhiga qiimaha baabuur kala duwan oo joornaalka lagu xayeysiiyey, iyo tirada dadka ku nool Portland iyo dadka ku nool magaalo kale oo ardayga saaxiibkii ama qof qaraabada ahi ku noolyahay.*
- ❑ Raadi jajab iyo boqollayda beeca dukaan dariskaaga ahi uu gado. Ilmahaagu ha xisaabiyo lacagta kuu soo hari kartaa haddii alaab xaraash ah aad gadato.
- ❑ Isu gee, kalana goo lacag doollarro ah si aad u raadiso jajab tobanle. Ilmahaagu marka hore ha qiyaaso qiimaha dhowr shay, ka dib ha isu geeyo qiimaha dhabta ah.

Notes:

*Fadlan la xariir Macalinka ilmahaaga si aad u waydiiso Barnaamijyada wax aqriska iyo qoraalka iyo Xisaabta meelaha laga heli karo.*

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
Academics Office
353 Cumberland Avenue
Portland, Maine 04101
207.874.8100
portlandschools.org

Warbaxintaan ama Qoraalkani waxaa soo saaray Dugsiyada Dadweynaha ee Degmada Portland. Qoraalkaan waxa la isticmaalay waxna laga badalay iyadoo fasax laga heysto Dugsiyada Dadweynaha ee Boston. Waxa jira oo kale qoraal kale eek u saleysan howlaha uu qabtay Dr Anthony L. Moore.

Created spring 2014

**Somali**